Marwo Marshall D. Orson, Guddoonka Guddiga
Marwo Vickie B. Turner, Guddoon Ku xigeenka
Mudane Stan O. Jester
Dhaqtar Michael A. Erwin
Marwo Allyson Gevertz
Mudane Diijon DaCosta
Dhaqtar Joyce Morley

Marwo Cheryl Watson-Harris, Kormeeraha guud

WIXII SIIDEYNTA DEGDEGA

Luuliyo 14, 2020

La xiriir:
Portia Kirkland, 678-427-4898
Carla Parker, 404-734-1717

Qorshaha Dib u furida DCSD: Bilowga Dib loo dhigay, Ku fur Nooca Waxbarashada Ka fogaanta/Onleenka

STONE MOUNTAIN, Ga. – Kormeeraha guud ee Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb Cheryl Watson-Harris waxay soo bandhigtay qorshaha dib u furida Degmada inta lagu jiray kulanka Guddiga Waxbarashada shalay.

Qorshaha hadeer wuxuu ku talinayaa in guddiga dugsiga dib u dhigaan bilowga sannad dugsiyeedka 2020-2021 ee Agoosto 17, 2020, oo ku furaan dugsiyada nooca waxbarashada fogaanta/onleenka si loo tixgeliyo faafida hadeer ee la taaban karo ee COVID-19. Guddiga wuxuu ansixiyay taariiqda bilowga dib loo dhigay.

Qiimeynada la cusbooneysiiyay iyo qorshaha saxitaanada waxaa la wadaagayaa bil walba.

Qorshaha degmada ee lagu dhafay hagida hadeer ee ka imaaneyso Waaxda Caafimaadka Bulshada ee Georgia, Guddiga Caafimaadka Gobolka DeKalb, Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurka (CDC), Waaxda Waxbarashada Georgia (GaDOE), Hay'ada Adeega Waxbarashada Goboleedka Metropolitan (MRESA) ee la shaqeynayo kormeerayaasha guud, iyo saraakiisha deegaanka iyo gobolka. Jawaab celinta bulshada ee ka timid sahanka tallada daneeyayaasha, taas oo soo saartay 39,574 jawaabo ka imaaneyso waaladiinta, ardayda iyo shaqaalaha, sidoo kale la ogeysiiyay qorshaha.

“Badbaadada ardaydeena iyo shaqaalaha waa mudnaanta ugu horeyso ee Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb, iyo waqtigaan waxaan ku talineynaa nooca waxbarashada fogaanta/onleenka inay bilaabato sannadka,” waxaa tiri Kormeeraha guud Cheryl Watson-Harris. “Iyada oo la tixgelinayo faafida la taaban karo ee aageen hadeer, iqtiyaarkaan waa dooqeena ugu wanaagsan, laakin dib ayaa loogu qiimeynayaa si joogta ku saleysan. Ardayda, macalimiinta iyo shaqaalaha waxay sidoo kale helayaan illo badan oo iyaga loogu taageerayo goobta fogaanta.”

Degmada waxay iibsaneysaa 1:1 Chromebooks si ay u hubiso in ardayda ku jirto fasalada Pre-K illaa 12 helaan tallo. Ardayda iyo waaladiinta waxaa u suurtogaleyso inay eegaan noocyada lagu baranayo sida si guul ah loogu isticmaalo illaha softaweerka, oo ay ku jiraan laakin kama xadidno VERGE iyo Microsoft TEAMS.

DCSD waxay sidoo kale bixinayaa helitaanka VERGE iyo Microsoft TEAMS ee la taliyayaasha dugsiyada si ay u sameeyaan kulamada hagida, sidoo kale sida joogtada lagu siinayo shaqaalaha Tababarka Gargaarka Koowaad ee Caafimaadka Maskaxda Dhalinyarada 101. Dugsiyada iyo macalimiinta waxaa lagu taageeray inay doortaan aalado kale sida Zoom iyo Google Classroom oo way soo xiriirinayaan illaha ku haboon ardaydooda iyo waaladiinta.

Bilaabaneyso Luuliyo 14, 12-bilood shaqaalaha waxay bilaabayaan dib ugu laabashada dhinaca qaabka isku dhafka ah, si loogu diyaariyo furitaanka dugsiyada. DCSD waxay hormarineysaa jadwalo diyaarsan oo u ogolaanayo macalimiinta, shaqaalaha taageerada, iyo ardayda si ay markaas si badbaado ah ugu galaan illaha waxbarashada iyo/ama fiiriyo qalabyada oo loogu diyaargaroobayo bilowga sannad dugsiyeedka.

DCSD waxay sidoo kale aasaaseysaa qoraalada hormarinta xirfada oo lagu taageerayo macalimiinta iyo hogaamada, oo ay ku jiraan waxbarashada naxdinta, eexashada cad, bulshada-dareenka, ku darista iyo isticmaal ku haboon ee aaladaha waxbarashada dhijitaalka iyo onleenka iyo nidaamyada. Kulamada hormarinta xirfada waxaa loo bixinayaa wadaagida habdhaqamada ugu wanaagsan iyo xeeladaha si ay wax ku ool ugu barto oo u kormeerto hormarka ardayga oo jawiga waxbarashada onleenka.

Macalimiinta waxay helayaan fursada looga qeybqaato isku marka iyo waxbarashada onleenka ee diirada saarto sida loo isticmaalo Microsoft Teams iyo Zoom si loo fududeeyo waxbarasho toos ah, sare loogu qaado ka qeybgalka ardayda, oo loo bixiyo waxqabadyada diirada la saaray oo loogu taageero dhinaca shirka fiidiyaha.

Degmada waxay qorsheyneysaa cuntooyinka caafimaadan oo kala duwan, taas oo buuxiso jaheynada faderaalka oo heerka fasal walba, oo quracda, qadada iyo cuntada fudud/cashada (sida ay quseyso). Waaxda Nafaqada waxay la shaqeyneysaa Waaxda Gaadiidka si ay ugu gaarsiio cuntooyin wadooyinka baska dugsiga oo qoysaska aan haysan helitaanka gaadiid.

Qorshaha wuxuu ugu yeerayaa in qaabka waxbarashada barbardhignaato faafida cudurka la xiriirto ee bulshada ku jiro. Hooseynta iyo faafid la'aanta, nooca dhaqan ahaanta ayaa la isticmaalayaa. Yaraanshaha iyo faafida dhexaadka ah, midkood waxbarashada dhaqan ahaan, la isku dhafay ama fogaanta/onleenka ayaa la isticmaalayaa. Hadeer, aaga wuxuu la kulmayaa faafid la taaban karo, marka nooca waxbarashada fogaanta/onleenka ayaa lagu taliyay.

Degmada waxay si joogta ah u kormeereysaa xogta hadeer ee COVID-19 oo qiimeeyo heerka faafida si loo go'aansado haddii iyo goorta nooca waxbarashada hadeer la saxayo. Qiimeynada waxaa la soo bandhigayaa inta lagu jiro kulamada xubnaha ee Sebteembar 14, Oktoobar 19, Nofeembar 9, iyo Diseembar 7, 2020.

Sahanka tallada bulshada wuxuu muujinayaa in shaqaalaha inta badan (boqolkiiba 70) iyo waaladiinta (boqolkiiba 59) aysan ku qanacsaneyn nooca waxbarashada dhaqan ahaanta in sannadka lagu bilaabo. Noocyada la isku dhafay iyo noocyada fogaanta/onleenka waxay aahayeen dooqyo aad ugu qanacsanaa oo labada kooxba. Ardayda waxay tilmaantay raaxo weyn oo nooca dhaqan ahaanta.

Riix halkaan si aad dib ugu eegtid bandhiga qorshaha oo dhan https://www.dekalbschoolsga.org/documents/plan-presentation.pdf , oo ay ku jiraan sharaxaadaha ku saabsan nadiifinta la cusbooneysiiyay iyo nidaamyada dayactirka.